PATIENT EDUCATION

# Isku Dhafka Kaamarada Eegitaanka Qeybta Sare Ee Caloosha Iyo Raajada (ERCP)

## Waa maxay ERCP?

- Waa baaritaan lagu sameeyo nidaamka dheecaanka beerka (jadwalka dheecaanka) xameetida, beerka, iyo beer yaraha ayadoo la adeegsanaayo tuubo jilicsan, fudud oo loo yaqaan Tuubada dhuunta qofka laga geliyo ee baaritaanka.
- Dhakhtarka ayaa daawada xubnaha jirka muujisa ku dura nidaamka dheecaanka beerka marka raajada qofka laga qaadaayo. Raajadu waxay dhakhtarka ka caawinaysaa inuu arko nidaamka dheecaanka beerka, xameetida, beerka, iyo beer yarta.
- ERCP waxay aqoonsan kartaa cudurada xameetida, nidaamka dheecaanka beerka, beerka, iyo beer yaraha. Waxaa nidaamka dheecaanka beerka laga heli karaa unugyo dheeraaday ama dhagxaan inta la sameynaayo ERCP-gaan.

## Waa maxay qaliinka dabada lagu sameeyo?

- Qaliinka dabada lagu sameeyo waa jarista murqaha (papilla) ee ku heerarsan daloolka tuubada.
- Waayar yar oo koronto leh ayaa loo isticmaalaa in la gooyo muruqa oo ka dhigaya furitaanka mid weyn.
- Midan wax xanuun ah kuguma keenayso. Furista daloolka waxay suurtagelinaysaa in dhakhtarku soo saaro dhagxaanta, inuu geliyo tuubo yar, balaariyo unugyada iyo inuu sameeyo muunooyin unugyo ah.

## Sidee u iskugu diyaariyaa ERCP?

- Waa in aad raacdaa tilmaamaha la xiriira cuntada aad cuneyso oo dhakhtarku ku siiyey.
- Diyaarso darawal iyo qof kula jooga maalintii. Laguuma oggolaan doono inaad gaari ka xeyso kadib suuxdinta
- Dhamaan dahabka waa in guriga looga soo tago.
- Ilkaha macmalka ah ee ilkaha la dulsaaro iyo muraayadaha waa la saari doonaa kahor ERCP.
- U sheeg dhakhtarkaaga haddii aad xasaasiyad ku qabto daawooyinka uu ku jiro iodine ka ama daawada lagu duro xadidka.
- Qaar kamid ah dadka waxay u baahan karaan antibiyootig.
- Xaqiiji in dhakhtarkaagu oggaado haddii aad uur leedahay kahor maalinta ERCP.
- Waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo in aad si kumeel gaar ah u joojiso qaar kamidka ag daawooyinka kahor ERCP-kaaga.
    - **Dhiig Khafiifiyayaasha**
        - Sida Coumadin (warfarin), Ticlid (ticlopidine hydrochloride), Agrylin (anagrelide), Xarelto (Rivaroxaban), Pradaxa (Dabigatran), Pletal (Cilostazol), Brillinta (Ticagrelor), Eliquis (Apixaban), Effient (Prasugrel), Plavix (Clopidogrel), iyo Asbiriin. Waa inaad kala hadasho dhakhtarkaaga kuu qoray daawada ama qof ku takhasusay ugu yaraan 2 todobaad kahor ballanta ERCP. Ha joojin qaadashada daawada adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
    - **Daawada Insuliinta iyo Macaanka (Sokoroowga)**
        - Fadlan la xiriir dhakhtarkaaga la socda heerka guluukoos. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo in wax laga bedelo daawooyinkaaga taasoo ku xiran cuntada aad cunto ee looga baahan yahay ERCP. Ha joojin qaadashada daawada adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.

## Waa maxay waxyeelada ka dhalan karta ee suurtagalka ah?

- Jeexdinta ku timaadda darbiga hunguriga, caloosha, qeybta hore ee xiidmaha yaryar, tuubada xameetida, ama tuubada beer-yarta.
- Waxyeelada caafimaada ee aan wanaagsaneyn ee laga dhaxlo daawada suuxdinta.
- Caabuqa ama dhiig baxa.
- Caabuq ku dhasha beer yaraha (Caabuqa beerka yar).
- Ciladaha ka dhasha cudurada aan la xariirin,

## Maxay tahay inaan fisho inta lagu jiro ERCP?

- Dhakhtarkaaga ayaa sharaxi doona khataraha iyo dheefaha ERCP kahor ERCP.
- Waxaad saxeexi doontaa foom oggolaansho oo la xariira ERCP.
- ERCP waxaa lala sameyn doonaa raajo.
- Waxaa xadidka lagaaga xiri doonaa cirbada kanoolka si laguugu siiyo dheecaan iyo daawooyinka suuxdinta.
- Waxaa lala socon doonaa heerarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga iyo ogsijiinta.
- Waxaad calool-calool ugu seexan doontaa miiska raajada.
- Waxaa la adeegsan doonaa suuxdinta guud si laguu suuxiyo.
- Tuubo ayaa la gelin doonaa dhuunta hawa mareenka si ay kaaga caawiso inaad neefsato inta lagu jiro ERCP.
- Tuubada caloosha la geliyo waxaa lagaa gelin doonaa afkaaga.
- Marka lagu geliyo tuubada, dhakhtarkaagu wuxuu daawada muujisa xubnaha jirka ku duri doonaa nidaamka dheecaanka beerka waxaana la qaadi doonaa raajada.
- Ayadoo ku xiran waxa lagu oggaado raajada, dhakhtarku wuxuu go'aansan doonaa qaabka ugu fiican ee uu
  u daaweynaayo dhibaatadaada ama cudurka aad qabto.

## Maxaan filan karaa kadib ERCP?

- Waxaa lala socon doonaa heerarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga iyo ogsijiinta muddo dhan hal saac inta aad kujirto qolka soo kabashada.
- Waxaa kula joogi doona qoyskaaga inta lagu jiro wakhtiga soo kabashada.
- Waxaa lagugu xiri doonaa ogsijiin muddo yar kadib ERCP.
- Waxaa laga yaabaa inaad dareento dibiro ama dhuuso sababo la xariira hawada gudahaaga gashay inta lagu jiray ERCP.
- Maxaa iyo goorta aad wax cuni karto waxaa go'aamin doona dhakhtarkaaga.
- Haddii aad qaadato Coumadin, Plavix, ama daawo kale oo dhiiga khafiifisa, waydii dhakhtarkaaga goorta aad dib
  u bilaabi karto.
- In kastoo ay ku xiran tahay natiijooyinkaaga ERCP, dhakhtarkaaga waxaa laga yaabaa inuu rabo inaad joogto isbitaalka habeenkii si laguula socdo.
- Kalkaaliso ayaa ku siin doonta tilmaamo qoraal ah kahor inta aadan bixin.

## Goorma ayaan helayaa natiijooyinkayga?

- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona waxa lagaa helay kahor inta aadan aadin guriga.
- Waxaad natiijooyinkaaga unugta la baaro ku heli doontaa boosto muddo labo ilaa saddex asbuuc ah.
- Waad wici kartaa xafiiska dhakhtarka haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah.


**Tixraacyada**

Fahmida ERCP - Bulshada Maraykanka ee Tuubada GasatroinERCPinal (American Society for GasatroinERCPinal Endoscopy, ASGE)

Fahmida Daaweynta ERCP – Bulshada Maraykanka ee Tuubada gaaska ee caloosha la geliyo (American Society of Gastrointestinal Endoscopy, ASGE)